

# CAALAMKA AKHRISKA

CABDICASIIS GUUDCADDE

Copyright © 2016, Cabdicasis Guudcadde  
Buugyarahana waxa loogu talagalay in lagu faafiyo qaab ah *xuquuq furan*. Waxa la  
oggol yahay in loo fidiyo hababka elektaroonigga ah, haddii oo keli ah oo ujeedku  
yahay in farriintiisa la gudbiyo, oo aan lagu xadgudbayn lahaanshihiisa.

Sawirka loo adeegsaday jeldiga waxa iska leh, [alcott1 / Mary Ellen](#).

Jeldiga waxa naqshadeeyay, Cabdixaafid Mowliid.

Wixii talo ama xidhiidh kale ah waxa aan ugu soo hagaagi kartaa cinwaanka,  
[muslim.guudcade@hotmail.com](mailto:muslim.guudcade@hotmail.com)

*Akhristaha damcadda u haya buugta.*

Buug kale

*Garashada Wax Lagu Gartay (2015)*

*Xigtaysiga Xikmadda [la qoray, Cabdixaafid Mowliid] (2015)*

# Mugga Buugga

ARAR  
vii

Micnihiisa  
1

Mudnaantiisa  
7

Midhihiisa  
21

Marrinkiisa  
35

Akhris Dheeraad ah  
49



# ARAR

Tirakoob uu maxadka UNESCO u qaabbilsan tirakoobku soo saaray ayaa lagu xusay war aan farxad badan wadin. In 757 (toddobo boqol iyo konton iyo toddobo) qof oo qaangaadh ahi aanay wax akhriyi karin, waxna qori karin (illete). Waxa tirada weyn ka mid ah 115 milyan oo dhallinyar ah oo 67% ay ka sii yihiin dumar!<sup>1</sup>

Warkaa naxdinta leh waxa igala sii naxdin badan marka aan fiiriyo xaaladda Soomaalideenna ay akhriska ka taagan yihiin. Run ahaan waxa lagu doodi karaa in aynu ka maqannahay Caalamka Akhriska, ama ugu yaraan aynu sidii gorayadii lug keli ah kula jirno.

Si haddaba aynu ula tacaalno heerka xun ee akhrisku innaga marayo, waxa innala gudboon in midkeen kastaaba la yimaaddo qaadhaanka uu ku darayo dhiilla-ka-saarka ummadda. Waa qaadhaanka kor u qaadista akhriska Soomaalida.

Buugyarahani waa dhurta ka dhalatay qoraallo taxane ahaa oo qoruhu uu ku fidinayay baraha bulshada bishii Ramadaan ee 1437. Qoraalladaa waxa looga dan lahaa si loo jeclaysiiyo Soomaalida, oo marfashyada ay ka sheekeeyaan loogu soo daro, wax-akhriska. Marka jeclaysiintaasi guulaysato, waxa uu qoraalku naawilayay in la dhiso xidhiidh adag oo ruuxa Soomaaliga ah iyo buugga ka dhex bilaabma. Xidhiidhkaa oo midhihiisa la gurto. Fekradda ah in qoraalladii taxanaha ahaa inta oo tifaftir dheeraad ah iyo lagu sameeyo naaxnaaxin buugyare la isugu keenaa waxa ay ka duulaysaa xaqiiqada ah in wixii la diiwaangeliyaa yihiin waxa hadhaya ee loo aayayo. Qubane kala daadsan ayaa uu noqon lahaa musalsalkii maqaallada ahaa ee soo taxnaa bishaa Ramadaan labaatankeedii hore, haddii aan la isugu keeni lahayn buuggan.

---

<sup>1</sup> Waxa aad booqan kartaa degelka rasmiga ah ee ay ku shaqeeyaan qolyahani, si aad uga bogato tirakoobka. <http://www.uis.unesco.org/Pages/default.aspx>

Waxa aynu u kala qaybinaynaa buugyaraheennan afar geeddi. Bilawgaba waxa aynu ku furfuranaynaa micnaynta akhrisku waxa uu yahay iyo taariikhdiisa oo aad u kooban. Waxa aynu dabadeedna ku xigsiin doonnaa sharraxidda mudnaanta uu akhrisku u leeyahay akhristaha, cidda aan wax akhrinna uu kala maqan yahay. Waxa aynu qaybtan ku eegi doonnaa waxa akhriska siiyay qiimaha uu leeyahay maanta. Waa waxa keenay in aynu wax ka qorno; maxaa aynu ku aragnay akhriska! Muhiimaddan aynu sheegi doonnaa ma aha mid u gaar ah dadka qaangaadhka ah, ama jinsi gooni ah, waa mudnaan LOO DHAN YAHAY, oo saamayntiisa ay arkaan yar iyo weynba. Waxa inoogu xigi doona qayb aynu ugu talagalnay in aynu ku faahfaahinno midhaha uu goosto qofka akhriska la dersaa. Waa natiijada rasmiga ah ee uu u hadho ruuxa markiisii hore wehelka ka dhigtay dhigaalku. Markan waxa aynu u gudbaynaa qaybta u danbaysa, oo malahayga u muhiimsan, oo xoogga saaraysa jidka loo maro hanashada akhriska.

*Qoraha*

1

**MICNIHIISA**

## **Qeexid iyo Dhiraandhirin Guud**

Xubnaha qofku ka helo dareenku waa lix. Shan ayaa se u caansan. Dhegta oo maqalka qaabbilsan. Isha oo aragga u qaybsan. Carrabka oo dhadhanka lagu og yahay. Dubka oo taabashada ku filan. Iyo, sanko oo urinta ka adag.

Dhegtu waa ay ka da' weyn tahay, ayaa la yidhaahdaa, isha. Sidee?

Dhegtu waxa ay heshaa oo ay soo werisaa warar iyo xogo aanay ishu arag, ama aanay suuragalba ahayn in ay joogto.

Tusaale ahaan,

Mudane Magan awoowgiisa labaatanaad waa Cismaan. Taariikhda awoowgii waxa u soo weriyay oo uga sheekeeya Aabbihi. Xilliga uu dhashay, cidda dhashay, xilliga uu aqal galay, cidda uu dhalay, ilaa dhacdooyinkii nolosha oday Cismaan ugu waaweynaa ayaa looga sheekeeyay. Haye? Waa kaas isaguna sii faafiyay oo ka warramay taariikhda sidaa u fog ee aanu xaaddirka ahayn... maxaa u saamaxay? Dhegta ayaa warkaa soo gudbisay saw ma aha?

Haddaba waxa aad ka warrantaa haddii taariikhdaa awoowgii aan looga sheekayn mudane Magan e, la qori lahaa. Magan Aabbihi ayaa qoray taariikhdii oday Cismaan. Haye? Magan baa buuggii arkay. Waa uu akhristay. Ka dibna waxa uu helay xog buuxda oo le'eg tii aynu ku soo marnay markii qoraalku aanu jirin.

Labada goorba waxa uu Magan helay xogta shakhsiyad noolayd xilli aanu noolayn.

Maxaa ka dhalanaya tusaalahaas oo kale?

Waxa aynu ku doodi karnaa in akhrisku yahay, “*Habka isha looga dhigo mid la cimri ah dhegta.*”

Oo maxaa inoo diidaya in aynu qaamuusyada safar ku soo marno? Waxba!

- Qaamuuska afka Soomaaliga ee uu qoray marxuum Yaasiin C. Keenadiid, waxa uu ku ujeeddaynayaa erayga “Akhriyid” in uu yahay, “Eray ama hadal qoran kicin; ku dhawaaqid; naqid; marin.” Bogga 9.
- Eray-qeexaha kale ee ay wada diyaariyeen Bare Cabdalle C. Mansuur iyo Annarita Puglielli ayaa isaguna boggiisa 20 waxa uu erayga “Akhri” ku sheegayaa in uu yahay, “Erayo ama weedho qoran daalacasho ama kor ugu dhawaaqid.”
- Qaamuuska ugu tunka weyn afka Ingiriisiga ee Oxford ayaa isaguna ka agdhawaynaya oo “Reading” ku xusaya in uu yahay mid la ujeeddo ah, “Fasirashada qoraal ama xaalad la saarto.”
- Mucjamka weyn ee af Carabidu waxa uu erayga “القرءاءة” ku micnaynayaa in uu yahay, “Ku-dhawaaqidda wax qoran.”

Intaa ka soo gudub. Aqoon ahaan, akhrisku waa hab dheegasho ah oo uu akhristuhu erayada qoran ka dheegayo macne buuxa, oo haddii ay erayadaa midba goonidiisa u qornaan lahaa aanay suura gasheen in akhristuhu helo macnaha uu damacsanaa qoruhu inuu soo gudbiyo ee uu helay marka uu isla akhriyay.

Bal aynu si kale u dhigno, oo aynu dhahno, “Akhrisku waa hab garaadka ku shaqo leh (cognitive process), oo maskaxda aadanuhu xuruuf xardhanayd uga dhigto erayo ilaa weedho is-haysta oo ujeeddo dhammaystiran samaynaya. Ujeeddo

dhammaystiran u samaynaya cidda akhriyaysa iyo cidda loo akhriyayaba, haddii ay jirto." Oo mar ayaaba la gaadhsiyaan in akhrisku yahay mid ka tirsan hababka ugu kakan, uguna cajiibsan, hanaannada maskaxdu maamusho.

Waxa jira wax la dhaho "kicin" oo ah awoodda uu qofku u leeyahay in uu xarfo meel ku xardhan kiciyo, ku dhawaaqo, isla jeerkaasna fasiraad u keeno; oo ugu yaraan uu fahmi karo. Ma istidhi eraygan "kicin" waa midka inoo buuxin kara midka "Literacy" ee af Ingiriiska? Horta waa isku ujeeddo.

Dadka qaarkood, siiba carruurta, waxa ku dhaca jirro la dhaho, "Kicinwaa – Dyslexia." Waa cillad caqliyeed oo qofka ka dhigta mid aan kicin karin, isla jeerkaasna aan fahmi karin, waxa hortiisa ku qoran ee xuruufta ah. Dadka caynkaas ah waa lala tacaalaa, oo dawayn maskaxaysan ayaa lagu kaalmeeyaa. Xaraf ama eray kasta, waxa loo raaciyaa sawir si uu u xasuusto. Waa tusaale ka mid ah sida loo caawiyoo dadka noocaas ah.

Dad caan ah oo soo taxnaa saynisyahan Albert Einstein ilaa jilaa Abhishek Bachchan ayaa cudurkaa qabey, balse lala tacaalay, dadka aad taqaannidna soo baxay. Innagu kollayba qofka caynkaas ah "Dammiin dhako weyn," ayaa aynu u naqaannaa, oo kaalmayn iska daa e, karaahiyo ayaa aynu ku hiiftaannaa! Runtiina waa dhaqan sillan oo ay tahay in laga koro.

Akhrinta waxaa lagu tiriyaa hababka ugu fiican ee lagu qiimayn karo xaaladda qof ilaa tan qaran. Oo haddii ay akhrintu liidato waxay inay siinaysaa awood ah inaynu ku xukunno qofkaa/qarankaa, in horumari uu ka dheer yahay, sida kalana waa run.

\*\*\*

## Taariikh Kooban

Waxa la rumaysan yahay in qarnigii lixaad ee tirsiga Galbeedka uu soo baxay adeegsiga erayga "Reading." Qabiilladii Saxon ee degaysay aagga webiyada Thames & Kennet ayaa uu innagu celinayaa. Akhriskaba, sida taariikhdu xusto, waxa la odhan jiray "Reada ingas," taas oo la ujeeddo ah, "Dadkii **Reada**." Eraygan "Reada" waxa uu ahaa magac la siin jiray hoggaamiyaha Saxon. Qoraal uu qoray Tim Lambert oo uu ku ladheeyay, "A BRIEF HISTORY OF READING, BERKSHIRE," ayaa uu ku doodayaa in taariikhda akhrisku waqtiga sidaa u sii fog innagu celinayso.

Albert Manguel, qoraaga "A History of Reading," ayaa ku tilmaamayay akhrisku in uu nafta aadanaha muhiim ugu yahay sida neefsashaduba muhiim ugu tahay. Waxa kale oo uu ku cabbirayaaba in akhrisku yahay "Furaha fahmida dunida." Haddiiba aad rabtid in aad dunidan fahamtid, oo aad ballaadhisid aqoonta aad u leedahay, wax akhri, weeye talada Manguel. Dhanka kale waxa uu Albert Manguel iyo buuggiisu banka keenayaan taariikho wax-akhri oo aad u durugsan. Aristotle iyo Ibn Haysam ayaa uu soo qaadanayaa oo akhriska laga fujin la' yahay.

Taariikhdaa uu soo gudbinayay Tim Lambert mid ka shishaysa ayaa aynu ku arki karnaa buugta iyo qoraallada taariikhda akhriska. Waxa aynu arkaynaa iyada oo dadka wax akhriya ee buugta la jaalka ah dib loogu celinayo Ciise Hortii. Waxa se aynu isku oggolaysiin karnaa labada tebinood, in Lambert iyo asaaggii ay ka hadlayaan taariikhda akhriska ee waddamadooda, balse aanay dunida oo idil ka wada turjumayn.

Sidaas oo ay tahay, horumarka uu akhrisku samaynayay aad ayaa uu gaabis u ahaa. Beri aad u dhaw oo ku siman badhtamihii qarnigii 18aad ayaaba dunida akhriska uu ku soo biiray wargeyskii u horreeyay, "The Reading Mercury."

Waxa uu Tim Lambert soo werinayaa in taariikhdaas qarnigii 18aad tahay meelihii uu akhrisku sameeyay horumarka laxaadka leh. Waloow la istusi karo in marka loo eego maanta sida uu yahay, aanu berigaa waxba ahayn. Bal qiimee, Soomaalideennu halkee ayaynu kaga dhacaynaa xaaladdeenna maanta?!

2

# MUDNAANTIISA

Dadku waxa ay wax u akhriyaan ujeeddooyin kala duwan. Waa intooda wax akhrida e! Muhiimadda uu agtaada ka leeyahay akhristu, waxa aad ka qiyaasi kartaa adiga oo naftaada wayddiia wayddiin keli ah, “Haddii akhriska aan joojiyo, maxaa aan waayayaa?”

Qof kastaa waxa uu qiraa, si ama si kale, in akhrisku muhiim yahay. Balse, weligaa ma iswayddiisay sababta?

Marka aad loo soo koobo, waxa aynu tixi karnaa dhawr mudnaanoood oo akhrisku u leeyahay akhristaha, qofka aan waxba akhriyini uu kala maqan yahay.

Haddii aad gasho baadhayaasha internetka ku shaqeeya, waxa aad la kulmaysaa qoraallo badan oo laga sameeyay saabsanahan. Waa kuwo aad u badan oo akhristuhu dareemi karo runnimadooda. Sidaas oo ay tahay innagu halkan minguuris dhammaystiran ma samaynayno e, sookoobis fahan guud looga dan leeyahay ayaa aynu isla wadaagi.

## **I. Wax la akhriyaaba, talo la hel!**

Mar kasta oo aad wax akhridid, waxa aad barataa oo aad la kulantaa walxo cusub, xogo cusub, iyo war cusub. Xataa habab wax loo xalliyo oo hor leh ayaa aad la kulantaa. Marrino baroo ah oo yoolalka lagu xaqiijiyo ayaa aad heli kartaa... waa haddii aad yoolal leedahay e! Waxaaba laga yaabaa in akhriskaa badani kugu simo in aad is-heshid oo aad ogaatid waddadan aad haysid in ay tahay tii kugu qummanayd iyo in kale. Waa adigaa ku sii adkaystay ama ka aag-beddeshay.

Beryihii hore haddii afka uun wax la isaga soo gudbin jiray, ogobeey haddeer erayga dhigan ayaa awooddaa qaatay. Waa taa sababta haddii awel ay ahayd “War la helyaaba, talo la

hel,” aynu uga dhigayno, “wax la akhriyaaba, talo la hel.”

## **2. Isbaxnaanin**

Haddii jidhka la geeyo goobaha muruqyada dhisa, oo la layliyo, maskaxda iyo ruuxda maxay ayaa kobciya ma taqaan? Shan xaraf ayaa ay warcelintu noqonaysaa: AKHRIS.

Akhrisku waxa uu kaa caawiyaa in aad dunida in badan sii fahantid. Akhrisku waxa uu kaa caawiyaa in aad si xoog ah u fahantid saabsane aad xiisaysid oo wax laga qoray, mid aanad jiritaankiisa ogaynna aad ka warheshid. Siyaabaha qorshaha loo dhigo, hababka kalsoonida loo kobciyo iyo waddooyinka ruuxda loo quudiyaba waxa kuu haya wax aad akhrido. Waa sidaa sababta aynu u leennahay qofka raba in uu isbaxnaaniyo oo naftiisa, ruuxdiisa iyo garaadkiisaba dhaashi u qoraa ha la saaxiibo buugta.

## **3. Shiidaalka Go'aanqaadashada**

Inta aanad go'aanka qaadan, waxa aad u baahanaysaa in aad fahamtid waxan aad go'aanka ka qaadanaysid, iyo in hore loo arkay. Halkee? Buugta iyo qoraallada ayaa markanna ku caawin doona. Maarka aad go'aanka qaadatid, si aad fal ugu beddeshid oo aad u dhaqangelisid, waxa aad u baahanaysaa in aad akhridid siyaabo hore oo go'aanno loo meer mariyay. Waa la-taliye aan gunno kaaga baahnayn. Inta yar ee aad bilawga hore ku soo iibsatid ma ogi e. Waxaaba la dejiyaa qaacido dhan oo ah, “akhri » baro » samee » gaadh.”

## **4. Waaya-aragnimo**

Buug marka aad akhriyaysid wanaagsan, waxa aad guranaysaa midhaha waaya-aragnimada iyo ogaalka ah ee qof kale, waxa

aanad maaalaysaa maanka ruux aan kuu dhawayn fogaan ahaan, ama/iyo waqti ahaan. Waxa aad baranaysaa qaabka loo noolaa beri hore, qaabka loo fekeri jiray, duruufaha, dhibaatooyinka iyo xalalkooda. Waxa aad ka baaqsanaysaa in aad u nuglaatid in lagaa qaniino isla god qoraa wax qoray beri hore laga qaniinay.

Qoraaga reer Faransa ee André Maurois waxa uu xusayaa in buugtu tahay “*hab muhiim ah oo qofku fahamkiisa ku ballaadhin karo isaga oo kaashanay waxyaabaha ay la kulmeen dad hore oo buug ku dhigay.*” Dhanka kale, Cabbaas Maxamuud Caqaadka Masriga ah ayaa laga hayay, “*Mid ka tirsan waxyaabaha akhriska i jeclaysiiyay waa in aan nolol keli ah noolahay..... [dabcanna] nolol keli ahi iguma filna!*” Waxa uu Caqaad xusayaa in qofkii qawaday noloshaan keliyaalaha ah ay u furan tahay waddo kale oo aan qarash buuran ugu fadhiyin oo uu ku heli karo nolollo kale... AKHRIS. Nolollo kale heshayaana, waaya-aragnimadoodii heshay.

## **5. Hab xog-isgaadhsiineed**

Marka aad wax akhriyaysid, waxa aad helaysaa aag ballaadhan oo xogo, xeelado iyo xaqiiqooyinba ah. Waa mid ka tirsan jidadka wax la isku soo gaadhsiyo ee ugu tunka weyn akhrisku maanta. Qofba qofka uu ka war-hayn badan yahay, ayaa uu—sida la awaali kara—ka war-gudbin badan yahay. Waa sababta aynu u leennahay: haddii aad rabtid in lagu soo joogsado, oo waxa aad sheegaysaa uu midha-dhal noqdo, saamaynna yeesho, wax badan akhri, oo buugta ka dhigo il aad xogta-isgaadhsiinta ka kaashatid. Dhanka kale, maanta haddiiba aad rabtay in aad dunida ku xidhatid, wax-akhrisku waa irrida ugu natiijada fiican ee aad adduunka kula xidhiidhi kartid.

## 6. Awoodaynta Mooyaqooqaarka (khayaalka)

Marka aad dhex quustid badweynta khayaaliga waxa aad hanataa ruux mooyaqooqaarnimo ah. Waxa aad garwaaqsataa in waxyaabaha “suuragal ma aha” lagu summadaa ay tirsan yihiin haddii ay jiraanba. Akhrisku waxa uu ku siiyaa awood ah in aad hal shay dhawr xaglood ka eegtid, oo aanad ku kaaftoomin wejiga kuu muuqda uun. In aad soo eegtid wejiga kale, haddii kalana aad sawiratid. In aad go’aan ka gaadhid. Sida uu qabo JJ Wong, “*buuggu waa uu ka sarreeyaa mooyaqooqaarnimo. Waa xuub caaro oo weyn iskuna kaa xidha xogo aad haysay, kuwo aad hadda uun heshay iyo sawirashada kuwo kaa maqan.*

## 7. Gawaanraacid-diidnimo

Gawaanraac waa marka faras iska taagnaa ku lugdarsado fardo aagga ordayay, isaga oo faraska hore aanu ku talajirin markiisii hore in uu colka raaco. Markaas ayaa la dhaa: *wuu gawaanraacay*. Qofka wax badan akhriyaa kuma qanco inta xaddidan ee loo muujiyo, balse waxa uu suuraystaa inta ku filan ee uu muujisan karo, gaadhi karana. Haddii qofka aan wax badan la socon loo sawiro in dalkiisu meel rays leh geelana u roon u guuri doono, oo uu sidaa ku raaco, kan wax akhriyaa waxa uu sameeyaa baadhis iskii ah oo uu kaga soo hor-iyoo-daba-ka-wareego ballanqaadyada la bixiyay. Markaas ayaa uu soo xaqiiqsadaa in waxa la sheegay jiray... ama uu liilalaw iyo aafka baarkiisa uu ahaa. Khudbadaha siyaasiga ma dhegaysto e, gadaashooda iyo dhexdooda ayaa uu dhugtaa. Waxa uu ka soo jibba-keenaa wax aanu siyaasiguba islahayn waa la ogaa.

Qofkan aan wax akhriyini waa gawaanraace weyn. Gawaanraace u ah siyaasi, wadaad, qalinshubatayste kale ama

cid uun dayday ah. Waa ta ku keenta qofka aan wax akhriyin in uu noqdo kan u horreeya iskooxaysiga iyo iscolaadintaba; saa intaa kaabbihiisu u sheegay ayaa uu dunidaba moodaa e! Balse kan wax akhriyaa kuma qanco inta qof ama qofaf tirsani u sheegaan.

Intaas waxa aynu kaga soo gudbaynaa qodobbo aynu ku tilaamaynay in ay tusaale u yihiin mudnaanta akhrisku u leeyahay akhristaha, qofka aan waxba akriyini uu kala maqan yahay. Sida la iska garan karo, intan aynu sheegnay ma aha muhiimadda uu akhrisku leeyahay, balse muunad ahaan ayaa aynu u soo qaadannay.

\*\*\*

Waxa aan la kulmay buug uu ladh u ahaa, "The Teacher who couldn't Read: A Memoir," oo uu qoray John Corcoran. Waa xasuusqorkiisii. John Corcoran waxa uu ahaa qof guulaystay xag macalinnimo. Garaadle ayuu ahaa. Dugsigii sare iyo kuliyadiiba waa uu ka gudbay. Markii danbe waxa uu noqday bare dugiga sare ah oo caan soo baxay. Aakhirkiina waxa uu u barmoosay ganacsade guulaysta. Ta la-yaabka lehi ma aha in uu sidaa u guulaysto John. Waa mid kale. Waa xaqiiqada ah in intaas oo dhan aanu waxba akhriyi karin. In uu akhriska iyo adduunkiisaba ka maqnaa!

Waxa haddaba aan istusay in midkeen inta uu buuggaa arko hadhaw iswayddiyo, "waar dee ninka noocaa ahiba waa kaa guulaystay e, maxaa aad naga lahayd akhris baa mudnaan leh?" Waa sababta aan buuggaa uga hadli doono iyo duruufaha ku gedaaman.

Qaybo danbe ayaa aynu kaga hadli doonnaa akhriska iyo guusha waxa ka dhexeeya, balse iminka aynu buugga iyo

taariikhdiisa ku koobnaanno. Qofka akhriya buuggu waxa uu arkayaa judhaba in aanu John Corcoran guulaysan guul uu isagu qorshaystay isala jeerkaasna uu isu diyaariyay. Oo haddii aad la kulantid wax aanad qorshaysani ma guul baa? Kollayba anigu wax aanan dhadhamin karini guul iima aha.

Waxa uu qofka buuggaa akhriyaa arkayaa in John la kulmay silica aad u badan oo ay sabab u ahayd tayada ka maqnayd ee akhris. Nolol soolane iyo khajilaad miidhan ah, oo cabsi ka buuxdo ayaa buugga loogu tegayaa. Haddii wax laga faa'idayo buuggan, lagama faa'idayo in akhris-la'aantu tahay mid guul keenta e, waxa laga taransanayaa in hal-adaygnimada iyo dulqaadku yihiin kuwa keena guusha.

Tayadii ka maqnayd ee akhriska, waxa loogu beddelay tayo kale oo guushu aanay ka maarmin. Xataa akhrisku aanu waxba tarayn la'aantood. Waa tayoooyinka go'aanka, joogtaynta, hal-adaygga, iyo samirka.

Waxa kale oo aad buugga ku arkaysaa in markii danbe uu akhriska bartay John oo uu noqday qof tayadii ka maqnaydna la yimaadda.

Waxa uu ina barayaa John cashar muhiim ah. Guusha waxa saldhig u ah astaamihii aynu soo seegnay ee hal-adaygga iyo samirku u muhiimsanaayeen, balse waxa dedejiye u ah akhriska. Hadda u fiirso halkan. *Akhrisku waa dedejiyaha (catalyst) guusha.*

## **Mudnaanta Akhrisku u Leeyahay Ubadka**

Xilliyada ciiddu soo dhawaato, waxa ganacsadaayasha ka baayacmushtara agabyada ubadku ku dheelaan u halhalays ah, “*Yaa ubad dhalay... misana jecel?*” Isaga oo ganacsadahaasi rabo in uu soo jiito dadka waalidka ah, si ay carruurtooda ugu gadaan alaabadaa. Innaguna waxa aynu iminka leennahay, “*Yaa ubad dhalay... misana akhris la jecel?*”

Akrisku waxa uu leeyahay mudnaan weyn. Mudnaantaa uma laha dadka qaangaadhka ah oo keli ah. Waa mudnaan la iska wada dhex arki karo. LOO DHAN YAHAY! Halkan waxa aynu ku soo qaadanaynaa muhiimadda uu akhrisku u leeyahay ubadka wax-akhriska la baro ama loo akhriyo, uuna kala maqan yahay kuwa aan intaa samayn loona samayn. Mudnaantaa waxa aan ka maqnayn midda u soo noqonaysa waalidkii ku tabcay ilmihisa ee akhriska ku xidhay.

### **1. Xidhiidhka warasada iyo waalidka oo xoogaysta**

Cunuggu marba marka uu sii weynaado, waxa bata dhaqdhaqaaqiisa—bannaanka u baxyaa, or-orod iyo ciyaar badayayaa, deegaankiisa la falgelyaa! Waa caadadii ee ceebtii marna ma aha. Haddii aad buug iyo akhris u ballaysintid, oo aad ku baashirtid, waxa uu buuggaasi noqon doonaa silsilad aan xuriyadda ka qadin ilmihii! Marka aad isugu timaaddaan miis aydaan cunto ku wada cunayn, aanu canaantaada ugu soo diyaargarobayn, balse aad caqliga ku korinaysaan oo aad wax iswaydaarsanaysaa, waxa soo dhawaanaya xidhiidhkiinna.

### **2. Aqoon-jeclaysiin**

Mid kale oo ka tirsan mudnaanaha uu akhrisku u leeyahay

carruurta raadbaradka ah iyo kuwa aan weli dugsiga gelin, waa in akhriska badani ilmaha ku tababbaro in uu hadhaw marka uu tacliinta bilaabo uu gaadho heer wanaagsan, waxbarashadii iyo sii-kororsashadeediina uu sii jeclaysto. Ilmaha caano uun laguma canqariyo e, caqli-dhisana (buug) waa lagu canqariyaa. Xataa awooddiisa kicineed ayaa ciyaalka badanaysa. Hadhawna biyo ayaa ay uga fududaanaysaa.

Haddii ilme yari la dhibtoonayo kicinta erayada iyo iskuxidhkooda si uu weedh u soo saaro, sidee ayaa aynu uga fili karnaa in uu la jaanqaado casharrada xisaabta iyo maaddooyinka kale ah ee uu dugsiga hoose kula kulmi doono?!

### **3. Hadal-barasho**

Haddii aad cunuggii yaraa ku dul akhridid weedhaha ku dul qoran buuggan aad u soo iibisay, sawirka la socdana—haddii uu jiro—aad farta ugu fiiqidid, waxa aad siinaysaa awood uu ugu tababbarto hadlidda. Haddii uu hadalkii bilaabayna, hadliddiisa uu sii kobciyo. Innagu Soomaali ahaan waa laga yaabaa in aad waydaba wax aad ilmihii u akhrido oo af Soomaali ku qoran. Waxa aan buuyarahan ku dhex xusayaa walaalaha bilaabay in ay soo saaraan warsidaha Carruurteenna<sup>2</sup> oo runtii ubadka Soomaalida ah anfacaya.

### **4. Ku-ababinta Qaab-akhrinta**

Ubadku kuma dhashaan aqoon iskaga abuuran oo u

---

<sup>2</sup> Warsidahani ma aha kii UNICEF ay soo saari jirtay. Waa mid ay bilaabeen koox Soomaali ahi. Halkan ka eeg, "<https://www.facebook.com/photo.php?fbid=1060056227371153&set=pb.100001003567929.-2207520000.1467335327.&type=3&theater>"

sheegaysa in qoraallada sida af Soomaaliga u qorma loo akhriyo bidix ilaa midig, kuwa sida af Carabiga u qormana loo akhriyo midig ilaa bidix. In aad ilmihii ku sii tababbartid in sidaasi tahay sida qumman, oo xataa sawirrada iyo erayadana aan la isku darin, waxa ay siinayaan carruurta itaal ah in ay xilli horaba la qabsadaan akhriskii ilaa heer buug, dabadeedna ay halkaa ugu soo xaaddiraan midhaha akhriska; oo aynu qayb danbe ku xusi doonno.

## **5. Anshax iyo basrinta oo ay bartaan**

Haddii aad sheeko uun uga sheekayso carruurta xilliga hurdada, waxa laga yaabaa in ay u arkaan wax lagu luloodo, oo lagu seexo, dabadeedna waxa ay xidhiidh ka dhexaysiiyaan maqalka ay sheeko maqlaan iyo lulada. Waa aragtidi "Xidhiidhintu Xakamaysan – Conditional Reflex Action," ee uu lahaa saynisyahankii Ruushanka ahaa ee Ivan Pavlov. Si taas looga baaqsado, oo ubadka loo baro in ay wax basristaan, siiba waqtiga, oo ay nidaamsadaan waxa ay haystaan, waa in akhriska la baraa. Weliba xidhiidhin looga dhexaysiiyaa asluubta nololeed ee hagaajinta waqtigu ka mid yahay iyo wax-akhriska. Waxa habkaa ku soo baxaya cunug laylsan oo tababar u haysta sida loo ilaashado, loona basristo, muhiimadaha waxa aad haysatid.

\*\*\*

Buugyare ay soo saareen "RMC Research Corporation, Portsmouth, New Hampshire," oo ay wada qoreen, Bonnie B. Armbruster, PhD [ka socda jaaacadda University of Illinois at Urbana-Champaign], Fran Lehr, M.A. [ka socda Lehr & Associates] iyo Jean Osborn, M. Ed. [kana socda jaamacadda University of Illinois at Urbana-Champaign], looguna wanqalay, "A Child Become a Reader," ayaa jira.

Waa cilmibaadhis ay khubaradaasi isugu tagtay. Waxa lagu soo ururiyay baadhisyo aragtiyo lagala soo dhanbalan karo, ku wajahan sida ubadka looga dhigi karo kuwo akhriska ku mamta.

Waxa buugyarahaas boggiisa kowaad lagu dhex sheegay in waddada akhrisku ka bilaabanto "guriga." Waa hadal aad u kooban misana micnihiisu sino ballaadhan yahay. Akhrisku ma aha natiijo ka dhalata iskuulka marka la galo, balse waa astaan loo baahan yahay si iskuul loo galo!

Waxa kale oo aan si kedis ah u akhriyay buug uu qoray fekeraa iyo qoraa reer Suuriya ah, Dr. Cabdikariin Bakaar, oo uu u bixiyay, “طفل يقرأ” – Cunug wax Akhrinaya. Waxa uu buuggani ii soo uruurshay warcelinnada aan u raadin lahaa su’aalaha keli ah ee, “Maxaa sababay in akhrisku mudnaan u yeesho ubadka? Ubadka maxaa loo abbaarayaa ee akhriska loo barayaa?”

Waxa uu digtoorku dabada ka gelayaa dhawr qodob.

I. Lixda gu’ ee u horreeya nolosha ilmuhu waa inta waxa uu qabtaa ay awood u leeyihiin in ay go’aan ka gaadhaan habaynta rabitaanka ilmaha, dhanka uu u badan doono iyo waddada uu raaci doono. Sidaas darteed ayaa jeclaysiinta ubadka ee xilligaa uu digtoorku ugu tirinayaa in ay aad u muhiim tahay. Waalidka qaar ayaa mooda in doonista akhris ee ilmuhu ay hadhaw iska dhalato, oo ay tahay wax iskeed (automatic) u dhacda; oo ay ubadkuba la soo dhashaan, waana sababta aanad u arkayn iyaga oo ciyaalkii ku dhiirrigelinaya akhrinta.

Sheeko ayaa uu soo rarayaa digtoor Bakaar. Waa oday ilmihiisii ku kharash-gareeyay sidii uu ugu iibin lahaa

baaskiiladda uu rabo, agabyada uu ku ciyaari lahaa, iyo wax ubad jecel yihiin oo dheesha sahlayaba. Yarkii waxa uu ku biiray asxaabta iyagana waxaas oo kale loo soo gado, waxaana balwad bilaw ah u noqotay daawashada shaashadaha, iyo maqnaanshaha badan. Odaygu waxa uu ballan kula geli jiray marka uu bushkileeti u iibiyaba, in uu hal buug oo da'diisa le'eg uu akhristo. Iminka waa toban iyo kow jir. Hal bogna ma uu akhrin, iska daa buug dhan e! Haddeer ayaa uu calaalacalayaa odaygii waalidka ahaa. Waa xilli xeedho iyo fandhaal kala dhaceen!

Waa taas. Waa sidaa natiijadu. Inta aanay saacaddu kaa hiilin, ubadkaaga u hiili oo akhriska ku bilaw lix jirkaba. Waxa la innagu yidhi toddobo jirka ubadka salaadda ku bara, iyada oo laga tegey in ubadka loo diyaariyo in uu noqdo mid salaadda ogaal u tukanaya ee aan ku-dayasho u tukanayn. Waxa la innagu yidhi toban jirka salaadda ku karbaasha. Qoraalkanna waxa uu ku leeyahay, toddoba jirkaa ama lix jirkiisaba ilmaha akhriska bar, toban jirkana isagu wax ha baro! Kollay iyo kollayba, ilme garaacis iyo maagis waxba laguma fahamsiiyo e, akhriska iyo salaadda midna ha ku karbaashin.

2. Ilmaha lagu soo ababiyo akhrisku waxa uu leeyahay fursado badan oo loo badin karo in uu yahay mid mustaqbalka noqon doona hal-abuure maanka adeegsada. Buugta marka uu saaxiib la noqdana, baadhidda iyo hubsashadu hub ayaa ay u noqonaysaa.

3. Ilmaha buugga iyo la-qabsigiisu waxa uu u furayaa albaab weyn oo uu ruux ahaan iyo caqli ahaanba ku kororsan karo. Noloshiisa balwad ka mid ah ayaaba uu akhrisku noqon, dabadeedna waxtar kasta oo akhris leeyahay waa uu la soo qabsan.

\*\*\*

Deraasad uu sameeyay ururka khayriga ah ee The National Literacy Trust oo ka dhisan U.K. ayaa uu ku sheegay – si ka-xumaani ka muuqato – in buugtu ay ku sii gabaabsi tahay liistada walxaha ubadku xiiseeyaan. 18 000 (toban iyo siddeed kun) oo carruur ah una dhexeeya 8 – 17 jir ayaa sahanka lagu qaaday. Lixdii cunugba mid ayaa aan buugba akhriyin bishii!

Shan meeloodoow saddex meelood (59.8%) ayaa dugsiga aaggiisa ku akhrista farriimaha la isu diro (messages) bishiiba hal mar. Tani waxa ay ka soo horjeeddaa 45.8% iyagu akhriya buug male-awaal ah bisha dhan hal mar.

Wax ku dhaw saddex dalooloow dalool (35.2%) ayaa kor u qaada, soona hadal qaada, buug male-awaal-ma-ahe (nonfiction) ah. Halka kala-badh carruurtaasi ay iimayllada akhrisanayeen.

Deraasadda waxa ka muuqatay cabsi iyo dardaarwerin laga sii dardaarwerinayo in ubadka sidaa xiisahooda akhris u hooseeyaa ay mustaqbalka soo baxaan kuwo aan dan iyo deero toona ka gelin wax-akhris iyo baddiisaba, sidaana kaga qada mudnaantii akhris. “Baadhiddayadu waxa ay tusinaysaa in lixdii ciyaalaba hal ka mid ahi aanu buugga ku akhriyin bil,” ayaa uu yidhi Jonathan Douglas, oo agaasime u ah kooxda deraasadda soo saartay. “Waxa aannu ka cabsi qabnaa in inta ay sidaa ku koraan ay hadhaw ku biiraan hal ka lixeedka (1/6) qaangaadhka ah ee mar danbe la kacaa-kufa akhriska iyo qoridda.”

Maxay deraasaddani muhiim inoogu tahay?

Waxa kooxdu ay aad ugu talisay in werwerkaa lagu bi'in karo hal xal. Waa iyada oo waalidku kula dedaalaan ubadka in ay akhriska jeclaysiiyaan. Taladaa haddii waalidku qaato, waxa loo badinayaa oo la isku qanciya in tibaaxda iyo dhurta sahankaas ay wax iska beddeli doonaan.

Waa halkan meesha ay iskaga soo dhacayaan qaybihii aynu kaga hadlaynay mudnaanta akhrisku u leeyahay ubadka akhriska la jeclaysiiyo, kuwa aan la jeclaysiinna uu kala maqan yahay. Qoraaga caanka ah ee Emilie Bushwald ayaa yidhi, *"Ubadku waxa ay akhristayaal ku soo noqdaan dhabta waalidkood."* Waa run oo dhabta waalidku, haddiiba uu yahay waalid akhriska mudnaantiisa yaqaana, waa jaamacadda u weyn ee soo saarta ubad wanaagsan oo akhriska iyo akhlaaqdaba ka dhisan.

Deraasad kale oo isla kooxdu samaysay ayaa ay ku ogaatay in ubadka u badani jecel yihiin in ay wax ku akhriyaan agabyada danab-ku-shaqeeyayaasha (electronic) ah. Sida: Tablet, eReader, I.K.K. Wax ka yar 28% ayaa xaashiyo la xardhay (printed papers) wax ka akhriya. Tan waxa anu uga faa'idaysan karnaa in aynu iskula talino in ubadka agabyadaa danabka ku shaqeeya loogu shubo wax si ama si kale uga caawinaya in aanay ka bixin badda akhriska.

3

**MIDHIHIISA**

Dad badan ayaa laga yaabaa in ay iswayddiayaan, *haddii aannu akhriskii micnihiisa fahamnay, oo mudnaanta uu noo yeelanayana garannay, maxay yihiin jaadadka midho ee laga guran karaa? Hadda waxa aynu u gudbaynaa in aynu iswarsanno, maxaa lagu helaa akhriska? Ha ku khaldin mudnaantii. Iminka ka hadli mayno muhiimadda uu kuu leeyahay, ee waxa aynu ka hadlaynaa natiijada ka dhalata marka aad akhriska la saaxiibtid. Natiijadan waxa hela akhristaha wanaagsan. Hoos ayaynu u dhaadhacaynaa.*

### **Akhriska iyo Qulubka**

Qulubku (stress) si fudud, waa *falcelin uu qofku ka bixiyo carin (stimulus) ku timi oo khalkhal gelisay dheelitirankii jidheed iyo kii maskaxeed ee qofkaba. Qulubka habab badan oo lagula tacaalo ayaa jira. Nasasho iyo shaah aad cabtid, ayaa inta badan caan ah. Balse, weli ma ka fekertay waxtarka aan yarayn ee akhrisku ka geysto qulub-yaraynta?!*

Deraasad ay 2009 soo saartay jaamacadda Sussex ayaa lagu sheegay in lix daqiiqo oo keli ah haddii qofka qulubsani u fadhiisto akhris ay taasi hoos u ridayso heerkii qulub 68%! [The Telegraph, March 2009].<sup>3</sup>

Iyada oo awelkaba akhrisku anfacu u leeyahay hawlo badan, misana waa in aynu maskaxda ku haynaa in marar badan ay tahay in akhriska xiisayn iyo raaxo loo akhriyo. Marka aad buug dhex quustid, ama male-awaal ha noqoto, ama sheeko jacayl ha noqoto, ama xataa male-awaal-sayniseed (Sci-fi) ha ahaado e, waxa ay taasi ku geyaysiin doontaa in aad qulubka ka madaxbannaanaatid maalin kasta. Waxtar duleed oo uu

---

<sup>3</sup> Halkan ka eeg deraasadda, <http://www.kumon.co.uk/blog/reading-reduces-stress-levels/>

hoos ugu dhigayo heerka garac ee wadnahaaga iyo fududaynta muruqyadaadu in aanay tigtigmin, ayaa akhriska laga helaa.

Dr Lewis, oo ah niyuuro-kasmonafeedyahan caqliyeed (cognitive neuropsychologist), ayaa ku tiraabay, “*Naftaada oo aad buug ku dhex illawdaa waa raaxaysi iska dhan. ... Run ahaan nooca buug ee aad akhriyaysaa micno ma leh, waxa muhiimka ahi waa in buuggii aad akhrido ee aad dhex quustaaba uu kugu simi doono ka-takhallusid aad qulubka maalinlaha ah u dhammasid.*”

Casharrada aad buugta qaar ka baran kartid ayaa kugu keeni karta in aad baratid siyaabo kala geddisan oo qulubka loo yareeyo, ama loo xakeemeeyo. Ogoow oo mar kasta oo aad buug kor u qaaddid, gurigana aad ku dhex akhrisatid, waalidna aad tahay, waxa ay taasi keensanaysaa in ubadku barto la-saaxiibidda buugta. Sidaasna waxa uu qoyskuba ku helayaa midhaha weyn ee qulub-dilidda ah ee akhriska lagu sheegay, lagana helay.

## **Akhriska iyo Caafimaadka Maskaxda**

Qofka wax badan si joogta ah u akhriya, ee akhriste macmiil ah u noqda buugtu waxa uu dhaxlaa waxtar badan oo ‘i tus oo i taabsii’ ah. Waxa aynu qaybtii hore kaga soo hadalnay sida mucjisada leh ee akhriskii aad taqaannay u saameeyo qofka qulubsan, ugana caawiyo in uu qulubka xakameeyo. Aynu hadda u wareegno qayb kale oo weynaanteeda iska leh.

Muddooyin badan ayaa akhriska iyo saamayntiisa, midhihiisa iyo natiijada uu akhristaha ku leeyahay la baadhayay. Aqoonyahanno badan ayaa arrintan wax badan ka yidhi.

Maskaxda aadanaha oo ah meel uu qofku ka tamariyo, oo uu wax weyn ku qabo, ayaa waxa soo gaadha cillado iyo caafimaad-darrooyin kale.

Cilladaha maskaxda iyo garaadka qofka weerara ee wiiqi kara haddii aan laga hortegin waxa ka mid ah “duqoobidda caqliyeed – cognitive aging.” Deraasad lagu daabacay warsidaha Neurology<sup>4</sup> ayna ka qaybqaateen khubaro badani ayaa arrintan lagaga hadlay. Waxyaabaha deraasadda oo la daabacay 2013 sheegayso in ay sabab u yihiin duqoobidda caqliyeed ayaa laga dheehan karaa qodobbo uu akhriska caadiga ah ee joogtadi ah maare u yahay.

Waxa ay iswayddiinaysaa Rachel Grate, oo qortay qoraal muhiim inoo ah oo ahaa, “Science Has Great News for People Who Read Actual Books,” waxa sababi kara in akhriska midhaha intaa le’eg laga goosto. Waxa ay ku soo gebagebanaysaa in nooca buug ee qofku akhrinayaa yahay kan muhiimadda leh. Waxa ilaa 2007, oo agabkan Kindle ee qoraallada danablaha ah lagu akhriyaa soo baxay, uuna aloosay dood ku wareegaysay, *ma buugta dahaadhka leh (paperback) ayaa waxtar badan, mise buugta danabka ku shaqeeya (ebooks)?*

Waxa ay Grate ku adkaysanaysaa in kuwa hore yihiin nooca qaab ee ay tahay qofku in uu ula saaxiibo buugta si uu u helo natiijadaa aynu sheegnay.

Muddooyin badan waxa soo baxayay sahanno aqoomeed oo taageeraya doodda Grate. Mid ka mid ahi waa tan lagu

---

<sup>4</sup> Halkan ka eeg deraasadda,  
<http://www.neurology.org/content/early/2013/07/03/WNL.0b013e31829c5e8a>

daabacay wargeyska *the guardian* ee ku andacoonaysa in akhristuhu xasuusto qoraalka uu ka akhriyo warqaad iyo buug daabacan, marka loo eego qoraallada iyo buugta lagu akhristo Kindle iyo agabyada kale ee eBook la isku dhaho.<sup>5</sup>

Waxa aynu ku doodi karnaa in midhaha laga goosto akhrisku yihiin kuwo ka badan kana dheef culus inta aynu sawiranayno. Waxa aynu leennahay: ku daweeya bukaankiina wax-akhris!

### **Akhriska iyo Guusha**

Midhaha laga goosto akhriska ma ku jirtaa guushu? "Haa" ayaa aynu ku doodaynaa.

Xidhiidhka akhriska iyo guusha ka dhexeeya ayaa aynu isla eegi. Diinta Islaamka aynu ka bilawno geeddigeenna.

Qur'aanku waxa uu inoogu bushaaraynayaa in uu wado guusha dhabta ah. Isla Qur'aankaa bushaaraadaa wada ayuu Alle u doortay in uu ku bilaabo erayga “Akhri – اقرأ.”

Natiijo ahaan, waxa isku xidhan, si ama si kale, guusha uu Qur'aanku wado ee bushaarada ah, iyo akhrinta Qur'aanku wado ee amarka ah.

**GUULAYSTAYAASHA IYO AKHRISTAYAASHA MAXAA KA DHEXEYYA?**

Haddii aynu helno astaamo ay wadaagaan akhristayaasha runta ah iyo guulaystayaasha dhabta ahi, waxa aynu ku doodi karnaa, in xidhiidhka akhriska iyo guushu yahay mid jira oo

---

<sup>5</sup> Deraasadda oo qoran halkan ka akhriso, <https://www.theguardian.com/books/2014/aug/19/readers-absorb-less-kindles-paper-study-plot-ereader-digitisation>.

mudnaantiisa leh, midhaha laga goosto akhriskuna yihiin kuwo jira. Aynu taxno tiraba toban sifo oo labada qolo wadaagaan.

### **1. Diiraddoodu ma leexleexato**

Dadka guulaystaa inta badan waxa ay xoogga saaraan hawl gaar ah muddo cayiman. Waa ay ka soo dhalaalaan. Ilaa ay dhammeeyanna, ma libiqsadaan. Oo qabyada waa ay neceb yihiin. Sidan oo kale ayaa lagu arkaa akhristayaasha wanwanaagsan. Qofka buug akhriyay, ee doonaya in uu akhriyaa, inta uu kala furo kama tago isaga oo aan dhammayn, oo midka kale iskama bilaabo. Mawduuca ayuu xoonsanaanta saaraa. Halkan ayaa uu ku sii tababbartaaba.

### **2. Yoolal ayay dhigtaan**

Iyaga oo diiradda adkaynaya, ayaa haddana akhristayaashu ay dejistaan hadafyo mar kasta oo ay wax-akhris u fadhiistaan.

Waxa aynu ka hadlaynaa akhristaha gaasa-baxay, ee wanaagsan. Inta buug ee uu akhrinayo, inta bog ee uu fadhigii kasta akhrinayo, iyo faahfaahinnada la midka ahi waa ay u qoran yihiin. Sidan oo kale ayaa lagu yaqaan guulaystayaashana. Qof aan qorshe dhiganini ma guulaysto, qof aan guulaysaninna qorshe muu dhigan. Hadafyadaas la dhiganayaa, ee guulaystayaashu dejistaan, ma aha mid maalinle ah oo keli ah, xataa hadafyo nololeed ayay leeyihiin. Qofku akhrista ayuu ku tabobbaran karaa.

### **3. Waqtiga waa ay ka faa'idaystaan**

Dadka akhrisyaasha ah waqtigu waa u muhiim. Ama in uu muhiim u noqdo weeye. Ma jiro waqti "firaayo" ah oo laga helo qaamuuska qofka akhristaha wanaagsan ah. Sidaas oo

kale guulaystuhu waa uu ka faa'idaystaa waqtigiisa. Ma lumiyo daqiiqadna. Si uu u xaqiijiyo hadafkiisii. In aad noqoto akhriste wanaagsan, ayaa kaa dhigi karta waqti-maamule wanaagsan. In aad noqoto waqti-maamule wanaagsanina waxa ay kaa dhigi kartaa guulayste wanaagsan.

#### **4. Xagal-araggoodu waa uu qaabaysan yahay**

Qofka akhristaha ahi wax uun ma akhriyo, ee dhinacyo badan ayuu wax ka eegaa. Xog keli ah kuma kaaftoomo. Xagasha uu wax ka eegayaa, ma aha mid qudha oo uu isku koobo. Sidaas oo kale ayuu xagasha qoraaga uu akhrinayaa u saamaysaa oo uu weliba ka faa'idaystaa isaga oo gorfayn samaynaya.

Guulaystayaashuba waa sidan oo kale. Meel keli ah inta oo uu wax ka eego, isma maqiiqo, ee wejiyada arrinta hor taalla oo idil, ama ugu badnaan, ayuu dheehdaa. Markan ayuu go'aan gaadhaa, dhaqaajiyaana. Waa mar kale oo haddana akhriskii noqday tabobbaraha guulaystaha.

#### **5. Waa laga dheehan karaa...**

Qofka akhristaha ah waa laga dheehan karaa waxa uu akhristay, ee uu weliba ku raadoobay. Noloshiisuba waa ay qaabaysan tahay. Qofkii akhristaha ahaa marka uu xaglihii wax laga eegayay uu badsaday, waxa uu isku dayaa in uu ummaddana uga faa'ideeyo oo uu waxsoosaar yeesho. Guulaystuhuna miyuuna sidaas oo kale ahayn? Inta uu naftiisa dhiso, miyaanu hadhaw dadka wax ku soo celin? Alla isu eekaa! Waa tabobbarkii akhriska.

## 6. Waa hadal iyo qorid-yaqaan

Khudbeeyayaasha dunida ugu caansani waxa ay ahaayeen dad akhrisku saameeyay, oo noloshooda uu ka muuqdo. Qofka qoraaga ah ee guulaysta, ama khudbeeyaha ah ee guulaystaa, waa qofba qofka uu akhriskiisu ka sarreeyo. Bal Abraham Lincoln eeg, bal Nelson Madela eeg. Dadkaasi, iyo kuwo kalaba, waxa ay noqdeen dad wax badan og. Qofku haddii uu wax badan og yahayna, wax badan ayuu sheegi karaa.

Caqliyadii dunida soo maray ee iyaga ka horreeyay ayay akhristayaasha wanwanaagsani ka faa'idaystaan, markaas ayaa ay saameeyaan xirfaddoodii qoraal iyo toodii hadalba.

Haddii berigii baadiyaha, ninba ninka uu ka maahmaah iyo gabay-xifdin badan yahay, uu aftahan ka ahaa, maanta waxa hubaal ah in ninba ninka uu ka taariikh iyo ogaal badan yahay uu ka aftahansan yahay. Sida oo kale waxa hubaal ah in qofina aanu taariikhdaa iyo ogaalkaa helaynin, akhris la'aan. Akhriiskii markanna waa tabobbare.

## 7. Xasuustoodu waa ay sarraaysaa

Akhristuhu waa qofka qudh ah ee yaqaan awoodda maskaxdu ay leedahay. Waxan uu akhriyayaa in ay maskax la mid ah ka soo baxday ayuu yaqiinsanayaa, ka dibna waxa uu isku deyayaa in uu tiisa ka shaqaysiiyo.

Dadka wax akhriyaa waxa ay buriyaan aragtidiisii Homer Simpson ee ahayd in "wixii cusub ee qofka ku soo kordhaa uu meesha ka saaro wax hore ugu jiray." Iyaga oo aan luminayn waxyaabihii ay hore u hayeen, ayay wax cusubna bartaan.

Akhriskaagu haddiiba uu bato, aqoontaaduna badatay. Aqoontaadu haddiiba ay badatayna, muhiimadda aad leedahay waa taa badatay. Muhiimadda aad leedahay haddii ay badatayna, fursadda aad ku guulaysan kartaa waa ay badatay.

## **8. Caajis waa uu ka dheer yahay**

Akhristayaasha wanaagsani waxa ay maskaxda u arkaan in ay tahay muruq ay tahay in uu shaqeeyo. Sida jimicsiga Gym-ku uu muruqyada gacmaha qofka uga dhigo kuwo giigsan, ayaa akhriskuna maskaxda uga dhigaa mid dhisan oo diyaar u ah in ay aqoon dheeraad ah qaaddo. Guulaystayaashu maskaxahooda ayaa ay si maalinle ah akhriska ugu jimicsiiyaan, si aanay u lumin firfircoonideedii. Waa adigaa arkay guulayste kastaa in uu yahay qof weli dhadhan u haya guusha, oo aan caajisin, ama – kaaga daranta— aan isdhiibin.

## **9. Aqoon iyo ogaal badan ayaa ay hayaan**

Guulaystayaasha waxa caawiyaa waa in ay wax barten. Marka ay buug gacanta u qaadaan, uma bilaabaan si ay u dhammeeyaan oo keli ah e, waxa ay u bilaabaan si ay wax ugala hadhaan. Waxa akhrisku baraa in ay wax kasta oo ay la kulmaan, xog ama xaqiiq kala hadhaan. Akhriska buugi uma aha laylis iskuul oo ay tahay in ay ka soo shaqeeyaan e, waa fursad ay garaadkooda ku kobciyaan. Guulaystuhu buug kasta oo uu akhriyayo, xataa kuwa male-awaalka ah, casharro ayuu ka dhex uriyaa oo uu kala soo dhex baxaa.

## **10. Fekerkooda ayaa ballaadha**

Qofka akhristaha ahi waxa uu isku dayaa in uu furfuro halxidhaalayaasha la xidhay qarniyo ka hor. Maskaxaha beri

hore fekeray ayuu la saaxiibaa, isaga oo waxqabadkoodii akhriyaya. Sida uu Rene Descartes yidhina, "akhrinta buugga wanaagsani waa sidii oo aad la doodaysid caqliyadii dunidan soo maray ee waxsoosaarka yeeshay."

Tani waxa ay u keentaa in uu noqdo qof feker ahaan xor ah oo aan u afduubnaan hadba qoraaga uu markaa la joogo. Maskaxdiisu akhristaha wanaagsan aad ayay u shaqaysaa. Waxyaabo badan oo wax laga yidhi, ayuu fahmaa, ka dibna raadiyaa xagal la banneeyay oo aan la iska taagin. Hal-abuurkiisa ayaa bata. Tani waxa ay u saamaxdaa in uu feker cusub la yimaaddo. Fekerkisaa ballaadhay waxa uu tabobbare u yahay guulaystaha. Qofi waxa uu qofafka kale guusha uga dhaw yahay inta uu hal-curinta (ibdaaca) uga dhaw yahay.

## DAD MIDHIHII AKHRISKA GOOSTAY!

Waxa aynu soo aragnay midho laga goosto beerta weyn ee ku taalla Caalamka Akhriska. Si hadalku aanu inooga noqon dhuran aanu la socon caddaymo, aynu u gudagalno dad saamayntooda la wada dareemay oo beertaa midhaheeda goostay.

### **I. Imaam Shaafici — Maxamed bin Iddiris.**

Isaga oo 13 jir ah ayaa uu damcay in uu waxbarasho u doonto Imaam Maalik oo Maddiina degganaa. Si uu u hanto qalbiga Imaamka, waxa uu wiilkaa yari sii akhristay, siina xifdiyay, kitaabkii Imaam Maalik ee "Al-mawdi'." Af Carabida cad ee uu ku hadlayo, iyo maskax-furnaantiisa markii uu u bogay, ayaa uu oggolaaday in uu arday u noqdo. Sidaasna muddo 16 gu' ah ayuu arday ugu ahaa, jeer oo Imaam Maalik geeriyooday.

## **2. Tokiyo Osahiro**

Waa ninka wax ka beddelay qaabka Jabbaan u taallo. Aas-aasihii matoorka Jabbaan. Waxa saameeyay akhris badan oo uu ku sameeyay sida reer Galbeedku u sameeyaan mashiinnada, iyo sida oo kale sida injiinku u shaqeeyo. Sirta u weyn ee Tokiyo xasuusqorkiisa ku xusay in ay caawisay waa akhris. Ka dibna dhaqangelin.

## **3. Thomas Edison**

Sannadguuradiisii tobnaad ee dhalashadiisa ayaa uu Aabbihii u keenay buug saynis ah oo ka hadlayay daahfuryadii iyo ikhtiraacyadii u waaweynaa ee dunida laga sameeyay. Waa buugga saameeyay. Wax badan oo muhiim u ah nolosha in la helay waa uu arkay. Sida oo kale waxa uu garwaaqsaday in wax kale oo iyaguna badan, muhiimaddooduna aanay yaran oo nolosha daruuri u ahi in ay maqan yihiin. Waa halka uu ka bilaabay geeddigiisa hal-curineed.

## **4. Mahatir Mohamed**

Waxa uu akhriyay oo baadhay horumarka dalalka kale. Jabbaan gaar ahaan. Baadhid dheer ka dib, waxa uu haddana dersay dalkiisa iyo xaaladda dadkiisa. 1970 isaga oo dhallinyaro ah ayuu soo saaray buuggiisii u horreeyay. Waa mid uu siyaasaddiisa ku caddaynayay. Xisbiga talada haya ayuu ku jiray. "The Malay Dilemma" ayuu ahaa cinwaanka buuggiisaasi. Guulaha waaweyn ee Mahatir gaadhsiiyay dalka Malaysia waa natiijada akhris sida horumarkaasi u ballaadhan yahay u ballaadhan iyo feker weyn oo uu la yimi.

**Nebi Maxamed: Ma-akhriye Guulaystay!**

Waxa ay diinta Islaamku ina baraysaa in nebi Maxamed aanu ahayn qof wax akhriya, waxna qora. Isla diintu waxa ay ina baraysaa in nebi Maxamed iyo colkiisu in badan guulaysteen! Qof ayaa laga yaabaa in uu arrintaa iyo isu eego xidhiidhkii aynu ka soo dhexaysiinnay akhriska iyo guusha, dababadeedna uu isyidhaahdo, "Oo haddaa nebigu sidee ayaa uu ku guulaystay haddii aanu waxba akhriyi jirin?"

Qaybtan kiiskaa ayaynu ku xalinaynaa. Ila soco. Waxa jira dad xoogay ah oo qaybtood Muslimiin yihiin oo ku dooda in nebigu uu wax akhriyi karayay, balse tafsiiir kale la saaray erayga "ummi" ee Qur'aanku u adeegsado. Saadiq Nayhuun iyo buuggiisa "Islam vs. Islam" ayaa ka mid ah, oo erayga "ummi" ka dhigaya mid la ujeeddo ah 'qof aan Yuhuudi ahayn.' Dooddaa ma gelayno. In nebigu aanu waxna akhriyi jirin, waxna qori jirin, ayaa aynu difaacaynaa se.

Qodobbo ayaa aynu tixi kartaa:

1. Ujeeddooyinka wax-akhriska waxa ka mid ah in guul uu kugu simo, saw maynaan odhan? Nebi Maxamed guushii uu akhrisku kala maqnaa waxa uu ka helay Alle iyo waxyiigiisa. Markaa baahiba uma uu qabin wax-akhris. Qofkee ayaa ina leh waxyi Alle ayaan helayaayoo akhris waxba ugama baahni?!

2. Shaqada nebiga ma ay ahayn in uu qabto tartan akhris iyo qoraal, sidaa darteed shardi laga rabey ma ay ahayn.

3. Farriin cusub ayaa uu la yimi. Markaa in uu wax akhriyo ama qoro, baahidee ayuu u qabey?

4. Haddii uu wax qori lahaa, waxna akhriyi lahaa, saw laguma

eedeeyeen in uu hal-abuurtay, ama soo dheegtay, waxyigan uu wado?!

5. Qur'aanka in aan la innaga xigin, dadkeenna diinta qaatay, ayaa dhadhamaysa, ee aanu ahayn mid uu gaar u lahaa nebigu. . Haddii uu wax akhriyi lahaa, dababadeedna nebiga lagu soo dejin lahaa "Akhri – اقرأ," waxa loo turjuman lahaa in wuxuba yahay sheeko ninkaa akhristaha ah keligii ku socota. Xikmadda maanta inoo muuqataana, ma ayan soo baxdeen.



4

**MARRINKIISA**

Hagaag. Qofku si uu ula saaxiibo akhriska, maxay ayaa uu u baahan yahay? Dabcan waxa markiiba lala soo boodayaa jawaab fudud. *In uu fahmo waddada loo maro la-saaxiibidda akhriska.* Aynu isla eegno hababka loo maro akhrinta.

## **Talooyin Guud**

Waxa aynu xusi doonnaa qodobbo qofka geyaysiin kara sidii uu u noqon lahaa akhriste wanaagsan oo micnaha, iyo mudnaanta akhriska fahamsan, midhihiisana goosta.<sup>6</sup> Dabcan waa talooyin kooban oo si guud uga tibiaxbixinaya hababka loo hanto *qalbiga* akhriska, dababadeedna *jacayl* loogu beero akhriska!

### **1. Go'aan-qaadasho**

Kama-horrayntaba waa in aad qaadataa go'aan ah in aad akhrin doontid buuggan/qoraalkan. Haddii aad qaadatay, qoro oo hoosta meel kaga xarriiqo. Waa muhiim go'aanka aad qaadatid in naftaadu ku laysan tahay oofinta ballantaas. Waxa aanad isla ogaataan adiga iyo naftaadu in aad leedahay hiigsi muuqda oo cad; tusaale, waa in toddobaadkan labadan buug akhriyaa. Waa go'aan.

### **2. Afka uu buuggu ku qoran yahay waa muhiim...**

Marka aad ku jirto in aad xulatid buugga aad rabtid akhrintiisa, waxa caws jiilaal ah in aad ku xisaabantid luuqadda uu ku qoran yahay. Jirtoo aynu isku dhiirrinayno in

---

<sup>6</sup> Qodobbada waxa aynu ka soo qaadanaynaa qormo hore loo faafiyay oo ahayd, "Si aad Buugaag Badan u Akhridid..." [Halkan ka eego, <https://aragtixora.wordpress.com/2015/12/28/si-aad-buugaag-badan-u-akhridid-2016-ka/>].

aynu ballaadhinno afafka aynu wax ku akhrin karno, haddana inta aad taqaannid kala mudnaan sii.

Dhiganayaasha diinta ku saabsan, tusaale ahaan, waxa daruuri ah in aad af Carbeed ku akhridid, si fahanku kuugu soo dhawaado. Buugta sayniska, sirdoonka, kasma-nafeedda, falsafadda Galbeedka iyo badi aragtiyaha casriga ah laga qoray waxa aad u baahan tahay in aad luuqadda Ingiriisida ku akhrisatid si aad u heshid erayada (terms) la adeegsaday.

Waxba yaanan ku soo warwaweejin e aan ku siiyo qaacido yar oo aan qof ahaan ku shaqeeyo, “Buuggu waxa uu dhadhan run ah yeeshaa marka aad ku akhridid afkii uu u doortay qoraagii qoray.” Warkaasi waa uu cad yahay saw ma aha? Ka soco.

### **3. Xiisaha Saabsaha aad u Haysid**

Marka aad doonaysid in aad akhrin fiican samaysid, oo aad wax kala hadhid buuggaa aad qalatay, waxa ay tahay in aad ugu horrayntaba dooratid dhigane ka hadlaya mawduucyo aad adigu qof ahaan xiisaysid. Haa, wixii aan la xiisayni ma xisaabsana. Qoraaga reer Maraykan ee Thomas Dexter Jakes ayaa mar yidhi: *“Haddii aanad yoolkaaga sixi karin, xiisahaaga waa in aad saxdaa. Muran li’i waxa aad xiisaysaa waxa ay kugu ridi doonaan yoolkaaga e.”*

Haddii saaxiibbadaa kuu ammaanaan buug gaar ah, iyaga ayaa uu xiise-geliyay; tan micnaheeduna ma aha in uu adigana ku raalli-gelin karo, sidaa darteed go’aanka ha ku qaadan xiisaha dad kale. Adigu naqayso nooca mawduuc ee aad u bogto, si aanad caajis iyo caga-jiidnimo danbe uga qaadin akhris idilkii.

Tan micnaheedu ma aha in la dhiirrigelinayo in aan la ballaadhin xayndaabka aad wax ka akhridid, maya akhri wax kasta, balse hubi in waxaa kastaa yahay wax ayna naftaadu dirqiyid ku dareemayn.

#### **4. Lug-gooyo... uma qalanto in ay lugta kalana ku jarto!**

Haddii aad ku khaldaytid buug aad wax weyn moodaysay oo uu weyd kugu noqdo, isla jeerkaasna aad ku soo lug go'day oo saw jeldigu ku hoday, bartaa aad ku dareentay in uu yalaalugo yahay buuggu ku jooji. Ma sii jirto sabab aad u siisid waqtigaaga sii akhrinta wax aad qirtay in aanu u qalmin sii wadid. Buug lagu luloonayo iska jir!

Taa beddelkeeda waqtigaaga u wareeji kaga faa'idaynta akhrinta waxqabaddo kale oo nafci leh. Oo maxaa kuu diidaya in aad layliska iyo lulada, kan hore jeclaatid? Waxba! Haddii uu buug B mar ku dagay, ha ka oggolaan in uu mar labaad ku dago, ee u aag-beddelo buug T.

#### **5. Qasab ma aha in aad bogagga oo dhan akhridid!**

Dadka badankiisu waxa uu u maleeyaa in ay sandulle ku tahay in ay buugga daba-ilaa-ka-dacal akhriyaan; A ilaa Y! Waajib, iyo xataa sunne toona, ma aha in aad buugga ilaa tusmadiisa ilaa mahadnaqiisa akhridid. Oo kaalay adigu ma waxa aad u socotay in aad wax ka ogaatid ciddii qoraaga caawisay ee uu u mahadcelinayo, mise waxa uu qoray ayaa aad lahayd quudo? Haddii aad ta hore u socotay, akhriste ma tihid ee "faduuli-qoraalleed" ayaad tahay! Haddiise ta danbe qasdigaagu ahaa, hore u soco oo ujeeddadu waxa ay taallaa Hordhaca/Ararta, Gunaanadka iyo inta u dhaxaysa ee qaabka

u suuragashan u akhriso, oo ha ku meeraysan magacyada xubnaha qoyska qoraaga ee uu u hibaynayo waxqabadkiisan!

Buugta aan kala qaadno. Midi waa mid aad tixraac ahaan u adeegsanaysid, baadhid aad waddid tusaale ahaan, midina waa ku aanad tixraac waqti xaadirkan u isticmaalayn. Haddii uu buuggu ka hore yahay, waxa kula gudboon in aad ammin fiican la qaadatid, cutubka aad u socotid mooyaane inta kalana aad ka booddid, ama dulmartid, goobaha uu isagu tixraacayana aad adiga laftarkaagu sii baadhid oo aad hubisid. Hawl weeye markan, mas'uuliyadi kaa saaran tahay. Balse haddi aanu noocaa ahayn, fahanka guud ee buugga hel, hana ku sii tiigaalin oo sida dhacda waqti ha ku bixin, in ay ku khalkhaliyaanna ha ka oggolaan, xigashooyinka iyo ilaha tixraac ee uu bixinayo qoraagu, jeer oo aad dhammaysid dulucda buugga.

## **6. Erayada mise Aragtida?!**

Weligaa ma aragtay dad marka ay buug akhriyayaan qaamuus weyn isa soo agdhiga? Marna buuggii ayuu eegayaa, marna eraygii ku istaaga ayuu dhigshineerka gelinayaa! Waa ruux laba buug akhriyaya, oo aan isdhaadsanayn!

Caqligeennu waxa uu awood u leeyahay in uu isagu maamulo, oo kala hufo, erayada xidhiidhka la leh aragtida uu qoraagu u socday iyo kuwa godadka lagu buuxiyay. Balse haddii aad adigu diiradda saartid sidii aad erayada u fahmi lahayd, oo aad kelmad-kelmad buuggii ku waddid, ii ogsoonooow waxa aad faa'idday micnayaasha erayadaas, oo Ilaahay mahaddii waxa kordhay mugga kelmadood ee aad haysid, balse dhibici kaagama gororayso fekraddii ka danbaysay buuggan aad akhriyaysid. Tolow ma intan ayaad u socotay; ma erayada in aad ka baratid ayaad buugga u soo

kala furatay mise in aad fahan ka qaadatid waxa meesha ku qoran? Tacab khasaar!

U daa garaadkaagu ha qabsado shaqadiisa, indhahaagana hawshooda ha ku qabsan, buuggu ma aha mid loogu talagalay in aad qaybtid ee waa ku ujeedka ka danbeeyay ahaa in aad qaybisid; una qaybisid waax fahanku ku jiro iyo waax kaashkaash ah, ta hore liq, ta danbana leef oo ha liqin! Kuma darin haddii buuggu uu ahaa mid aad ugu talagashay in aad mugga erayadaada ku kobciso!

## **7. Muddo u qabo buuggiiba**


Marka aad sidaa u soo qaadatid buugga ay tahay in aad akhridid, waa in aad isu qabataa muddo cayiman, isna wayddiisaa: horta dhiganahan intee in le'eg ayaa aad kaga fara-xalan kartaa? Tirada kuu soo baxda ka dhabee, oo yayna kula dhaafin. Waqti isu qabo, hal buug iyo muddo qeexan!

Bal u fiirso, laba buug oo midina kugu amaah yahay midna yeddaa yahay, waxa aad hordhamaysaa kan kugu ammaanada ah, sababma? Waxa aad ku xisaabtamaysaa waqtigii uu kuu qabtay qofkii/maktabaddii kuu dhiibay/tay. Oo maxaa diidaya haddii aad naftaada ka soo qaaddid in ay tahay cidda ku deymisay buuggan aad denbaabto adigu ee aad iska dhiganaysid leedahayna: kollayba adiga ayaa leh!! Adiguba waqti isu qabo oo kaga soo dhalaal muddadaa.

## **8. Akhriskaaga heerar u samee.**

Akhriska buugta aan mala-awaalka ahayni waxa ay u baahan yihiin tabo iyo xeelado ka xeeldheer mararka kale, waa in aad ugu yaraan heerar samaysataa. Buugga aad rabtid in aad ka bogatid ayay heerarkai ku run yihiin. Marka koowaad,

tusaale ahaan, buugga si guud u akhri. Mar kale cutubkii si gaar ah kuu soo jiita gooni ula bax. Mar saddexaad cutub-hoosaadkii aad caashaqdo, ama aad xiisaynaysid, afduubo oo si khaas ah kulan ula qaado, budlina! [Sawirka soo socda waxa uu soo koobayaa heerarka aad samaysan kartid marka aad akhris u fadhiisato].



Waa xeelad kugu simaysa in aad si dhumuc leh u fahanto meeshii aad farta u qaaddidba. Marka aad saddexdaa heer isaga soo gudubto, waxa aad samayn kartaa fekrad kale; waxa aad doonan kartaa buugaag kale oo isla mawduucan uu cutub-hoosaadkan aad dooratay ka hadlayay khuseeya.

## 9. Deegaan wax-akhris waa lagama-maarmaan:

Sida dhacda marar badan ayaa aad daal-maskaxeed iyo caajisnimo ka dareemi doontaa akhriskii, adiga oo ka caga-jiidaya ayaanad is-arki doontaa, balse ha shiddaysan, waxa aad kaga bixi kartaa adiga oo go'aan qaata, iskuna taxalujiya sidii aad diiradda u saari lahayd akhriskaaga. Codadka

muusigga, buuqa iyo wax kasta oo kansho/fursad siinaya in qulub soo kala dhex galo adiga iyo buuggaaga aad akhriyayso waa in aad meesha ka saartaa. Deegaan bilaa sanqadh ah doono

Qaababka aad deegaan akhriska ku wanaagsan u abuuran lahayd waxa ka mid ah:

1. Ammin go'an u calaamadi wax-akhris keli ah, waa waax waqtigaaga ka mid ah oo akhrin mooyee wax kale aanad qabanayn, wax kasta oo khalkhal kugu keenaya iska fogee.

2. Agabyada uu telefankaagu ka mid yahay ee mashquulka kugu keenaya, muusigga iyo wixii cod aan loo baahnayn leh, iyo wax kasta oo iftiin xumadu ka mid tahay ka takhallus. Adiga, buugga iyo bii'adaasi isku keliyooba.

3. Marka aad wax akhriyaysid qalinka iyo xaashidu yaanay kaa ag-fogaan, markii loo baahdana qoro qormo-qabyeedka (notes) daruuriga kuula muuqda. Tani waxa ay kaa kaalmayn doontaa in aad yaraysid fakaagga/fursadda aad wax ku ilaawi kartid.

4. Hubi in iftiinku kuu qaabaysan yahay. Ilayska xooggan iyo midka taagta daraniba kuma anfacayaan.

Haddii aad arrinta si run-run ah u geshid, oo ay kaa go'an tahay in aad kor u qaaddid heerkaaga wax-akhris, oo aad qaadatid tabobbar kugu filan, waxa aad is-arki doontaa adiga oo si dheerayn ah wax u akhriyaya, maqaallada, diiwaannada iyo buugta marka aad wehel u noqotidna waxa aad soo baxaysaa qalab wax-akhris! Waxa aanad farxad ku dareemi doontaa in aad qoraallada aqoonta kuu kordhinayau akhrido in ka siyaadsan sidii hore ee maalmaha ama xataa toddobaaddada qaadan jirtay!

Xilli-xilli naso, oo nafta ha daalin, siiba maskaxda ha ka oggolaan in ay tabcaannimo dareento, muhiimaddu waxa weeye in aad akhriska isbarataan, akhri, akhri, akhri, akhri...

\*\*\*

## **Ismaqashiinta Akhriska**

Marka wax-akhriska la bilaabo, marrinnada ugu qumman ee loo maro waxa lagu tilmaamaa in erayga aad akhriyaysid aad ismaqashiisid (reading aloud).

Qoraaga buugga "A History of Reading," ee Albert Manguel, waxa ku doodayaa in muhiimad weyn ay akhristaha u leedahay ismaqashiintu, oo waxa uuba gaadhsiiinayaa in fahmaddiisu fududaanayso. Afafka Cibriga iyo Aramayk, ayaa uu Manguel xusayaa, in erayga "akhri" uu agtooda micne ahaan ka yahay "yeedhmo."

Qarnigii 12aad ayaa uu Imaam Ghazali dhigay xeerar akhrinta iyo weelaynta Qur'aanka fududayn kara. Xeerka sagaalaad ayaa uu ku daray in "qofku ismaqashiiyo waxan uu akhrinayo."

Dhanka kale, waxa jirta weedh caan ah oo dhahda, "scripta manet, verba volat" — *Erayga la dhigaa waa uu sii negaadaa, erayga lagu dhawaaqaana waa uu socdaalaa.*

Sababta akhriska ismaqashiinta ah loo jidaynayaa waa iyada oo la og yahay in dhegtu ay kala saarto wax aanay ishu kala saari karin.

Hadda tan micnaheedu ma aha in aan waxba la akhriyin e,

buugtaba la dhegaysto. Taasi waa qaabdarro. Waxa ay xaqiiqadani innagu caawinaysaa, dhanka kale, in aynu iska ilaalinno akhriska aamusnaanta ah oo aynu ismaqashiinno, si fahmadeennu u siyaaddo.

Deraasado badan ayaa laga sameeyay raadka ismaqashiintu ku leedaay fahamka iyo gudbidda farriinta qoraal wato. Waxa ay isla oggol yihiin in xeeladdani tahay mid fahmadda iyo farriintaba soo dhawaysay. Ma aha carruurta oo la maqashiiyo oo keli ah, waa in xataa qofka buugga akhrisanayaa kor isu maqashiiyo.<sup>7</sup>

Buug badan ayaa laga qoray baabkan. Xoogay ka mid ah ayaa aan arkay. Waxa ka mid ah "In Defense of Read-Aloud: Sustaining Best Practice." ee uu qoray Steven Layne; "Reading Magic," oo uu qoray Mem Fox, iyo buugga caanka ah ee uu qoray Jim Trelease ee "The Read-Aloud Handbook." Waxa ay badankoodu ku siinayaa xogo iyo xaglo xiise badan oo arrintan ku saabsan... xagga ubadka iyo faa'idada uu u leeyahay maqashiintu ha u bataan e.

Mudnaanta ay leedahay tabtan ismaqashiintu waa ta keentay in xataa la jideeyo Maalinta Ismaqashiinta Akhriska ee Adduunka [World Read-Aloud Day], (24-ka February, gu' kasta).

## **Tayada mise Tirada?**

Dad badan ayaa ku tartama, oo malahayga ku faana, tirada

---

<sup>7</sup> Tixraac ahaan u eeg deraasaddan: Coltheart, Max; Curtis, Brent; Atkins, Paul; Haller, Micheal (1 January 1993). "Models of reading aloud: Dual-route and parallel-distributed-processing approaches." *Psychological Review* 100 (4): 589–608.

buug ee ay akhriyeen. **Cabbaas Caqaad**, gabyaagii iyo fekeraagii reer Masar, war aan taageero u ahayn dadka jaadkaa ah ayaa uu sidaa. Waa marka uu leeyahay, "Saddex buug oo wanaagsan oo aad akhridid waxa ka fiican hal buug oo wanaagsan oo aad saddex jeer akhridid." Waxa uu **Caqaad** ina tusinayaa in muhiimaddu aanay ahayn tirada aad akhriday ee mudnaantu tahay tayada.

Waxa aynu ku doodaynaa in marrinnada ugu qaayaha badan ee buug la akhriyay looga gurto midhihiisu uu ku jiro marrinka "ku celcelintu." Waa xeeladda tayada xoogga saarta, ee qofka ku qaadda in uu si fiican uga dhergo buuggii uu gacanta u qaado. Waxa aan bartay in mar kasta oo aan buug hore aan u akhriyay ku celiyo aan kala soo baxo xogo aanan hore uga helin, aan ku baraarugo qodobbo aan ilduufay doorkii hore, sida oo kalana aan sii ballaadhiyo fahmidda aan fahmayay buuggaa.

Wax u qalma in lagu tookho, oo la isugu faano, ma aha tirada buugta ee qofi akhriyaa. Balse ta sumcaddu ku jirtaa waa in la ogaado waxa qofku ka fahmay, kana istaafiiday buugga; taasna waxa lagu ogaadaa marrinno uu ka mid yahay heerka "ku celcelinta" ee akhristaha.

## **Albaabka Gorfaynta**

Akhristaha wanaagsan ee aad ugu raadoobay akhriska waxa lagu yaqaanaa in aanu *dameeri dhaan dhacday* iska ahayn e, uu shaandho weyn oo daloollo yaryar sito; waa shaandho uu ku kala haadiyo waxqabadka uu akhriyo si qoraalkii uu ugu kala saaro fur iyo fuud. Waa marrinnada ugu qiimaha badan, uguna midha-dhalka roon marrinnada akhriska loogu saaxiibi karo.

Harold Bloom, qoraaga buugga “*How to Read and Why*,” ayaa yidhi, “Gorfayntu waxa ay ka bilaabantaa—ayna tahay in ay ka bilaabanto—xiiso dhab ah oo akhriska loo hayo.” Qofku marka uu akhriska weheshado, xiise bandanna uu u hayo, waxa uu Bloom ku doodayaa in markaasi tahay marka uu diyaar u yahay in uu wax gorfeeyo.

Si waxa la qoray qaabka loo qoray u yeesho tayo, waa in cidda qortay aqoon u lahaataa, ama ugu yaraan ka dhisan tahay, sida wax loo qoro. Haddaba, si iyana waxa la akhriyay qaabka loo akhriyay tayo u yeesho, waa in cidda akhrisanaysaa yeelato aqoontii, lahaataana agabkii, ku habboonaa wax-akhriska habboon. Aqoomahaas iyo agabyadaas waxa ka kow ah in akhristuhu leeyahay awood gorfayneed—shaandho-miirto aanu daaniyuhu ka dusi karin iyo toosh talaata-xajar ah in uu sito qofkan wax akhrinayaa weeye.

Qofka akhristaha ah waxa bilaw ahaan looga baahan yahay in buugga uu akhriyo dhulka dhigin jeer oo uu hoosta ka xarriiqdo waxa buuggaasi ku saabsanaa; oo waa in uu sheegaa – ugu yaraan – waxa buuggaasi ku saabsanaa. Intaa waxa ku xigta in uu isa siiyo dareen xoogaysta oo ah in uu wax diido waxna yeelo.

Ma aha in uu weel madhan oo wax lagu shubto uu noqdo akhristuhu. Waa in uusan noqonin dadkii uu sheegayay **Alija Izetbegović**, qoraaga “Islam between East and West,” markii uu lahaa, “Wax-akhriska oo lagu talax tagaa fariiddo innagama dhigayso. Dadka qaar ayaa buugta gebigoodaba liqa, iyaga oo aan isa siin wakhti ay ku raamsadaan; [raamsashadaasina] waa mid qasab u ah qaadashada iyo fahankaba. Marka ay kula hadlayaan waxaa afkooda ka hadlaya Hiigal, Haygar iyo Maarkis oo aan biyo ismarin. Marka wax la

*akhrinayo shiiditaanka qofku waa muhiim, sida shinniduba dhabaqa u shiiddo uguna beddesho malab.”* Hadalkan **Izetbegović** waxa ka cad quruxda ku jirta akhriska ay ku lammaan tahay kala-haadintu, iyo – dhanka kale – foolxumada ay leedahay akhriska ka arradan kala-hufidda. Shinnadu, oo uu tusaale u soo qaatay, waxa ay kala gurtaa dhabaqa inta mucda leh iyo inta kale, waxa ayna habkaa ka soo saartaa malabka aad aragtay! Sidaas oo kale ayaa qofka akhristaha ahna looga baahan yahay haddii uu rabo in uu gaadho akhris sida malabka u mac in uu gorfaynta isku qalabeeyo.

\*\*\*

## Gebagebo

Waxa aynu isla soo eegnay qodobbo dhawr ah oo akhriska si ama si kale ula xidhiidha. *Caalamka Akhriska* ayaynu ku soo tamashlaynnay. Waa innagii soo qeexnay, taariikhdiisa soo dulka-xaadinay, mudnaantiisa soo taxnay, beertiisa inta aynu u daadannay waa tii aynu midhihiisa suuqgeynay, dabadeedna marrinanda iyo waddooyinka loo maro akhriskaa aynu soo sheegnay si loo goosto midhihiisa waa tii aynu soo xusnay.

Ujeedka buugyaheennani waxa uu ahaa in Soomaalida akhrisan doonta la jeclaysiiyo akhriska, la tuso mudnaantiisa, la dhex geeyo midhihiisa, aakhirkana loo soo jaro tigidhkii lagu tegi lahaa Caalamka Akhriska. Waxa aan filayaa in uu gaadhi doono ujeedkiisa.



## Akhrisyo Dheeraad ah

1. Manguel, Abert (1997) *A History of Reading*.
2. Bakkaar, Dr. Cabdikarim (2011) *Diflun Yaqra'*.
3. Bloom, Harold ( ) *How to Read and Why*.
4. Van Doren, Charles; Adler, Mortimer J. ( ) *How to Read a Book*."
5. Guudcadde, Cabdicasiis (2015) "Si aad Buugaag Badan u Akhridid..." La faafiyay Dec. 28, 2015. URL: <https://aragtixora.wordpress.com/2015/12/28/si-aad-buugaag-badan-u-akhridid-2016-ka/>.
6. \_\_\_\_\_ (2015) "Si aad Hal Buug u Akhrido Maalintii..." La faafiyay Dec. 20, 2015. URL: <https://aragtixora.wordpress.com/2015/12/20/si-aad-hal-buug-u-akhridid-maalintii/>.
7. \_\_\_\_\_ (2016) "Akhriska iyo Guusha Maxaa ka Dhexeeya?" La faafiyay May 26, 2016. URL: <https://aragtixora.wordpress.com/2016/05/16/akhriska-iyo-guusha-maxaa-ka-dhexeeya/>.
9. \_\_\_\_\_ (2015) "Waxa aad Hurtaa 30 Daqiiqo si aad..." La faafiyay Oct. 05, 2015. URL: <https://aragtixora.wordpress.com/2015/10/05/waxa-aad-hurtaa-30-daqiiqo-si-aad/>.